

contact *For families with disabled children*

SUPPORTED BY

MAYOR OF LONDON

10 talo oo looggu talagalay buuxinta foomka 'Disability Living Allowance' ee ilmahaaga

Buuxinta foomka 'Disability Living Allowance' ee ilmahaagu wuxuu qaadan karaa wakhti iyo taqwad badan. Maxaa yeelay, waxaad ka fikiraysaa wax yaabaha ilmahaagu qaban karin ood ka walaaci karto.

Iskuday innaad naftaada abaal marin siiso markaad foomka buuxisid ama dhamays tirto!

Foomka waxaad kala soo dagi kartaa ciwaanka Intarnadka ee 'Department for Work and Pensions (DWP)'. Booqo www.gov.uk oo raadi 'Foomka DLA ee Carruurta'.

Balse waxa ka wanaagsan innaad wacdo 0800 121 4600 ee DWP, codsatana in foomka DLA lagu soo diro. Foomka waxa lagu shaam-badayn taariikhda aad wacdo, si hadhow lacagta laggaaga soo bilaabo taariikhdaa. Waa muhiim, sababtoo ah foomka oo dheer, kuguna qaadan kara wakhti buuxintiisa.

Foomki wuu dheeryey wuxuuna ubaahanyey warbixin badan. Markaa qaado wakhti kugu filan oo ha isku dayin annaad mar kaliya buuxisid.

Foomka DLA wuu dheeryahay, wuxuuna u baahanyey warfaafin badan. Markaa sii wakhti kugu filan oo ha is odhanin mar kaliya buuxi.

Ka raadso caawimo haayad DLA taqaana ama wac Contact's Helpline' ee 0808 808 3555 oo raadso qof/haayad kuudhow oo ku caawisa.

Ka hor intaanad buuxin Foomka DLA, hal isbuuc qor daryeelka ilmahaagu u baahan yahay maalin iyo habeenba. Qoraalkan oo kaa kaalmayn doona buuxinta foomka ama aad u isticmaali karto caddeyn ahaan.

Iskuday innaad ka bixisid warfaafin badan oo ku saabsan daryeelka dheeraadka ah ee ilmahaagu ubaahanyey hadh iyo habeenba. Ku dar maalinta ugu hoysha

badan si loo fahmo caawimaadka dheeraadka ah ee ilmahaagu u baahan yahay. Ubuuxi foomka si aad ugu qanciso qof aan ilmahaaga la kulmin?

Haddii ilmahaaga xaaladiisa caafimaad is bedbeddelayso ama jirto isbedel maalinlaa isticmaad kalmadaha 'maalinta ugu daran' iyo 'maalmaha dabacsan' si aad u sharaxdo isbeddeddelka xaalada caafimaad ee ilmahaaga.

Kudar sida ay u eegtahay ilmahaaga maalinta ugu daran si qof kasta oo akhriya arjigaaga 'application' uu u arko adeegga saa'idka ah ee ilmahaagu ubaahanyey.

Ku dar ama raaci foomka caddeymo, sida warbixinno caafimaad ama 'psychologist reports', bayaanka 'speech and language' iyo qorshaha waxbarashada, caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka ee loo yaqaano EHCP, haddii aad hayso – ama wixii cadaymo ah ee kaa caawinaya waxaad ku qortay foomka DLA.

Si taxaddar leh u akhri foomka ka hor intaadan celin. Ma ku qortay macluumaad dhan? Ma ka jawaabtay dhammaan su'aalaha la xidhiidha baahida ilmahaaga? Halka laggaala soo xidhiidhaya ma saxbaa? Miyaad wax il-duuftay?

Kala hadh sawir ama koobi foomka iyo wixii caddeymo ah eed raaciso

Wixii kale ee talo ah booqo ciwaanka Intarnadka ee Contact:
www.contact.org.uk/dla